



Alaab la isticmaalay oo ka socota Grant ayaa ah mid wali nolosheedu ka sii muuqato dugsiyada dunida dhinacyadeeda.

Iyada oo duminta iyo dib u cusboonaysiinta ay ka socoto Dugsiga Sare ee Grant, qaybo ka mid ah dugsiyada taariikhiga ah waxay arki doonaan nolol cusub oo ka jirta dugsiyada kale ee fog sida Burundi, Africa.

Markii dhismaha Grant si ku meel gaar ah loo xiray bishan Juun si loo casriyeeyo, PPS waxaa la soo gudboonaaday caqabado ah go'aaminta waxa laga yeelayo in ka badan 3,700 qaybood oo ah alaab duug ah oo laakiin wali shaqaynaysa. Degmadu waxay la xiriirtay Hay'ada IRN Surplus – The Reuse Network, oo shaqadeeda shirkadeed tahay sidii alaabta iyo qalabka dheeraadka ah ee la isticmaali karo looga ilaalinta lahaa in aan qashin qubka la geynin, iyada oo la barbardhigayo ururo aan faa'iido doon ahayn oo ka jira Maraykanka iyo dunida dhinacyadeeda.

Dhammaan alaabtii duuga ahayd ee liiska ugu jirtay Grant waxaa meesha lagaga saaray shan maalmood oo keliya gudahood iyada oo loo kala qaybiyay 13 shixnaddood. Kow iyo toban ka mid ah kuwan waxay kala aadeen toddobada dowladood oo ka tirsan saddex qaaradood (El Salvador, Nicaragua, Mauritania, Mali, Somalia, Burundi, iyo Lebanon). Alaabta dugsiyada waa kuwo baahi sare loo qabo marka la eego dowladaha soo koraya. Shixnadihii soo hartay waxaa la siiyay Hay'ada Habitat for Humanity ReStores oo ku taala Oregon iyo Washington. Bakhaaradu waxay dib u gadi doonaan alaabta si ay taageeraan hawshooda dhismaha guryaha cusub iyo dayactirka guryaha duuga ah ee loogu talagalay dadka baahida qaba.

“Waa tusaale weyn oo loo dejiyay ardaydeena,” ayay sheegtay Jamie Hurd, Isku-duwaha Mashruuca Grant.

Ma ahan oo keliya xalinta dib u isticmaalku ay PPS u badbaadisay boqolkiiba 20 oo ah kharashka tuurida qashinka ah, sidoo kale waxay ka ilaalisay in wax ka badan 120,000 pounds oo alaab ah aan qashin qubka la geynin. Dadaalku wuxuu taageeray ballanqaadka Degmada ee wax lagu joogtaynayo iyada oo la caawinayo bulshooyinka kale ee baahida qaba. Fursada dib u isticmaalidu waxay sidoo kale gacan ka geysataa heerka Dugsiga Sare ee Grant ay saadaalisay ee barnaamijka LEED Silver (Hogaanka Tamarta iyo Qorshaynta Deegaanka).

PPS waxaa aad loogu yaqaanaa ballanqaadkeeda wax lagu joogtaynayo ee fasalka iyo hawlgalada labadoodaba, oo ay la socdaan talaabooyin ka bilaabma beeraha dugsiyada ilaa laga gaarayo ilaha tamarta ee la cusboonaysiin karo. Grant cusubi wuxuu yeelan doontaa in ka badan \$1 milyun oo ah mishiinka tamarta qoraxda ku shaqeeya oo la rakibayo.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan mashruuca Casriyeynta Granr fadlan booqo. <http://GrantBond.pps.net>.